DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 25AAD | CADADKA 9AAD | TAARIIKH: 26/9/25 | Lam. 03 |
|---|---|---|---|

## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZETTE

## الجريدة الرسمية

**wax-ka-bedelka Xeerka La-dagaalanka Argagixisada Dowladda Puntland**

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**wax-ka-bedelka Xeerka La-dagaalanka Argagixisada Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

**Sharciga Lr. 003 ee 25-ka Sibteembar 2025, kuna saabsan Wax-ka-bedelka Xeerka La- dagaalanka Argagixisada.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/27/2025, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2025.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo Wax-ka-bedel lagu sameeyo Xeerka La-dagaalanka Argagixisada, si loo ilaaliyo nolasha, hantida iyo xoriyadda shacabka Puntland, loo helo hannaan sharci oo wax looga qabto falalka argagixisada, loo xoojiyo awooda hay'adaha ammaanka, loogana hortago maalgelinta argagixisad.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Wax-ka-bedel Xeerka La-dagaalanka Argagixisada.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Office of the President
Puntland State of Somalia

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/27/2025** **Garoowe, Axad** **Taariikh: - 10/08/2025**

**Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntland**
**Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka La dagaallanka Argagixisada Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/203/2025 ee June 24, 2025, kuna saabsan wax-ka-beddelka Xeerka La dagaallanka Argagixisada Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-beddelka Iyo Kaabista Xeerka La dagaallanka Argagixisada Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 56-aad, Fadhigiisii 23-aad ee 27.07.2025 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-beddelka Xeerka La dagaallanka Argagixisada Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**34**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**32**) Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen (**2**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka La dagaallanka Argagixisada Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND * OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**

---

# WAX-KA-BEDDELKA XEERKA LA-DAGAALANKA ARGAGIXISADA DAWLADDA PUNTLAND

**GAROOWE, LUULYO, 2025**

# TUSMADA XEERKA

1


CUTUBKA KOOWAAD ........ 1

HORDHAC........ 1

**Qodobka 1-aad** ........ 1

**Magaca Xeerka** ........ 1

**Qodobka 2-aad**........ 1

**Eray Bixin** ........ 1

**Qodobka 3-aad**........ 4

**Ujeeddada Xeerka**........ 4

**Qodobka 4-aad**........ 5

**Baaxadda Xeerka** ........ 5

**Qodobka 5-aad**........ 5

**Mabaadi'da Xeerka**........ 5

**Qodobka 6-aad**........ 5

**Fal Argagixiso** ........ 5

CUTUBKA 2-aad ........ 6

FAL DEMBIYEEDYADA ARGAGIXISANIMO IYO CIQAABTOODA ........ 6

**Qodobka 7-aad**........ 6

**Gelidda Fal-Argagaxiso**........ 6

**Qodobka 8-aad**........ 7

**Asaasidda iyo Xubin ka Noqoshada Koox ama Urur Argagixiso** ........ 7

**Qodobka 9-aad**........ 7

**Samaynta ama Isticmaalka Hubka ama Agab Lagu Fulinayo**........ 7

**Fal-argagixisanimo**........ 7

**Qodobka 10-aad**........ 8

**Fal argagixiso oo ah Qafaalasho iyo Xoog ku Haysasho Qof ama Dad** ........ 8

**Qodobka 11-aad**........ 8

**Bixin ama Qaadashada Tababbar Argagixiso** ........ 8



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 12-aad
Gabbaadsiinta & Qarinta Wax Lagu ........ 8
Fuliyey Fal-argagagixiso ........ 8
Qodobka 13-aad ........ 8
Xayeysiinta Been Abuurka Ah Ee Afkaarta ........ 9
Urur Ama Koox Argagixiso ah ........ 9
Qodobka 14-aad ........ 9
Waajibnimada soo Gudbinta Xogaha ku Saabsan ........ 9
Falalka Argagixisada ........ 9
Qodobka 15-aad ........ 9
Shirqool iyo Abaabul Dembi Argagixisnimo. ........ 10
Qodobka 16-aad ........ 10
Ku Xadgudbid Shakhsi Diblomaasi ah ........ 10
Qodobka 17-aad ........ 10
Ku Xadgudbid Xarumaha Dawladda ........ 11
Qodobka 18-aad ........ 11
Kicin iyo ku Dhiirra-gelin Fal-argagixiso ........ 11
Qodobka 19-aad ........ 11
Adeegsiga iyo Samaynta Labbis ama Aqoonsi Ciidan Dawladeed ........ 11
Qodobka 20-aad ........ 11
Gacan-siin iyo Hagidda Fulinta Fal-argagixiso ........ 12
Qodobka 21-aad ........ 12
Afduubka Gaadiidka Dhulka, Badda iyo Cirka ........ 12
Qodobka 22-aad ........ 12
Maalgelinta Koox ama Qof Fal-argagixiso ........ 12
Qodobka 23-aad ........ 12
Is-hortaag Caddaaladeed Fal-argagixiso ........ 12
Qodobka 24-aad ........ 12
Xog Uruurin iyo Basaasnimo ........ 13
Qodobka 25-aad ........ 13
........ 14

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

**Xad-gudubyada ka Dhanka ah Badbaadada Gegooyinka** ........ 14
**Diyaaradaha** ........ 14
**Qodobka 26-aad** ........ 14
**Qaadidda Tallaabooyin Maamul** ........ 14
**Qodobka 27-aad** ........ 15
**Saamaxaad** ........ 15
CUTUBKA 3-aad ........ 15
QABASHADA, LA WAREEGIDDA IYO XAYIRIDDA HANTI ARGAGIXISO ........ 15
**Qodobka 28-aad** ........ 15
**Xayiraad Saarid Hantiyeed** ........ 15
**Qodobka 29-aad** ........ 16
**La-wareegid Hanti Argagixiso** ........ 16
CUTUBKA 4-aad ........ 17
ASTEYNTA ARGAGIXISADA ........ 17
**Qodobka 30-aad** ........ 17
**Habraaca Astaynta Shaqsi ama Urur Argagixiso** ........ 17
**Qodobka 31-aad** ........ 17
**Ka Saaris Liis Argagixisnimo** ........ 17
CUTUBKA 5-aad ........ 18
AWOODDA DACWAD QAADISTA ........ 18
**Qodobka 32-aad** ........ 18
**Maxkamadda Awoodda u Leh Qaadidda Dacwadaha** ........ 18
**Qodobka 33-aad** ........ 18
**Dacwad Oogaha** ........ 18
CUTUBKA 6-aad ........ 19
AWOODAHA BAARISTA, CADEYMAHA & WAARANKA ........ 19
**Qodobka 34-aad** ........ 19
**Qabasho iyo Baaris Waaran la'aan** ........ 19
**Qodobka 35 aad** ........ 19
**Awoodda Xirista iyo Sii Daynta** ........ 19



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 36-aad .... 20
Xarigga iyo Xabsi ku Haynta .... 20
Qodobka 37-aad .... 20
Baarista Gaadiidka iyo Rakaabka Saaran .... 20
Qodobka 38-aad .... 21
Baaritaanka Dadka Lugaynaya .... 21
Qodobka 39-aad .... 21
Oggolaanshaha, Caddeymaha Elektroonigga .... 21
Iyo Hababka Casriga ah .... 21
Qodobka 40-aad .... 21
Oggolaanshaha Guud ee Adeegsiga Nuqullada .... 21
Qodobka 41-aad .... 22
Caddeyn Markhaati-Khabiir .... 22
Qodobka 42-aad .... 22
Ilaalinta Markhaatiga .... 22
Qodobka 43-aad .... 23
Xafidaadda Caddeymaha Baaritaanka .... 23
Qodobka 44-aad .... 23
La Socodka Adeegga Isgaarsiinta .... 23
Qodobka 45-aad .... 26
Qaadista Astaamaha Faraha Iyo Muunadaha .... 26
Qodobka 46-aad .... 26
Hubinta Dekadaha, Garoomada iyo Xudduudaha .... 26
CUTUBKA 7-aad .... 27
ISKAASHIGA CAALAMIGA AH EE ARRIMAHA DEMBIYADA ARGAGIXISADA LA XIRIIRA .... 27
Qodobka 47-aad .... 27
Iskaashiga Dalalka kale Arrimaha Dembiyada Argagixisada .... 27
Qodobka 48-aad .... 28
Ujeeddada Codsiga Iskaashiga .... 28

**Qodobka 49-aad** ........................................

**Diididda Codsiga Iskaashiga** ........................................ 28

**Qodobka 50-aad** ........................................ 28

**Codsi Soo Gacan-gelin Eedaysane** ........................................ 29

**Qodobka 51-aad** ........................................ 29

**Sababaha Lagu Diidi Karo Gacan Gelin Eedaysane** ........................................ 29

**Qodobka 52-aad** ........................................ 29

**Xuquuqda Eedaysanaha** ........................................ 30

**Qodobka 53-aad** ........................................ 30

**Da'yarta iyo Haweenka** ........................................ 30

**Qodobka 54-aad** ........................................ 30

**Hawlgallada Gargaarka Bani'aadanimo** ........................................ 30

**Qodobka 55-aad** ........................................ 30

**Kormeerka, Magdhow iyo Racfaan** ........................................ 31

CUTUBKA 8-aad ........................................ 31

QODOBBO GABAGABO AH ........................................ 31

**Qodobka 56-aad** ........................................ 31

**Xeer-nidaamiye** ........................................ 31

**Qodobka 57-aad** ........................................ 31

**Burin**32 ........................................ 32

**Qodobka 58-aad** ........................................

**Dhaqan-galka Xeerka** ........................................ 32

........................................ 32

# CUTUBKA KOOWAAD

## HORDHAC

## Qodobka 1-aad

## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka La-dagaalanka Argagixisada Dawladda Puntland.

## Qodobka 2-aad

## Eray Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan:-

| Tix | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1 | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland. |
| 2 | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 3 | **Xeer** | Waxaa loola jeedaa Xeerka la dagaalanka Argagixisada Dawladda Puntland. |
| 4 | **Wasaarad** | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Amniga iyo DDR-ta. |
| 5 | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Amniga iyo DDR-ta. |
| 6 | **Argagixisanimo** | Waxaa loola jeedaa fal-dambiyeed uu geysto ama ay geystaan qof, koox ama urur oo ku salaysan abuurid xasillooni darro, argagixin, qarxin, dil, handadaad, qaadis lacago baad ah, burburin nidaam dawladnimo oo ay geystaan kooxaha ama shakhsiyaadka loo aqoonsan yahay argagixisada. |
| 7 | **Ujeeddo Argagixiso** | Waxaa loola jeedaa wax kasta oo looga dan leeyahay in bulshada dhexdeeda looga abuuro xaalad argagax |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

| | | |
|---|---|---|
| | | ah ama khatar lagu geliyo nolosha dadka, hantidooda, xorriyadooda, xuquuqdooda, isla markaana lagu waxyeeleynayo bedqabka bulshada iyo amnigooda ama lagu dhibaataynayo kaabayaasha asaasiga ah ee dawladda, nidaamka guud iyo danaha dawladda lagu curyaaminayo hay' adaha dawladda iyo adeegyada ay bixiyaan ama lagu waxyeelaynayo ama loogu hanjabayo shacabka reer Puntland, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa diblomaasiga ah, iyadoo la adeegsanayo isgaarsiinta, hub, qaraxyo, maaddo holacda, sun, feyras iyo agab kasta ee kale oo isla ujeeddadaas lagu gaarayo. |
| 8 | **Urur ama Koox Argagigixiso ah** | Waxaa loola jeedaa maleeshiyaad ka kooban saddex iyo wixii ka badan, kana jira dalka gudihiisa ama dibaddiisa oo loo abuuray ujeeddo argagixisanimo iyo in ay ku kacdo fal argagixisanimo. |
| 9 | **Argagixiye** | Waxaa loola jeedaa qof kasta oo fala ama gala ama isku daya inuu qorsheeyo argagixisanimo ama qof kale ku dhiirrigeliyo inuu fal caynkaas ah galo. |
| 10 | **Fal Argagixisanimo** | Waxaa loola jeedaa fal-dembiyeed kasta oo xeerkan loogu aqoonsaday, kaasoo ay geystaan ururrada dawladda Puntland u aqoonsan tahay argagaxisada sida, Al-shabaab, Daacish (ISIS) iyo Al-qaacida. |
| 11 | **Dembi-argagixiso** | Waxaa loola jeedaa fal-dembiyeed kasta oo ku cad xeerkan uuna u aqoonsaday in uu dhaliyo fal-argagixiso ah ama xeerarka kale ee Puntland. |
| 12 | **Hub** | Waxaa loola jeedaa agab kasta oo leh awood uu wax ku dilo, ku dhaawaco, ku curyaamiyo kuna burburiyo, |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

| | | |
|---|---|---|
| | | ha noqdo hubka xabaddu ka dhacdo sida: gantaal, madfac, qori, bastoolad iyo hub kastoo ku shaqeeya baaruud. |
| 13 | **Maalgalin Argagixiso** | Waxaa loola jeedaa hanti guurto ah ama maguurto ah, u fidin taageero dhaqaale oo muuqata, qarsoon, gacansiin maaliyadeed si toos ah ama si dadban, u xawilid lacageed, wadiiqad kasta oo kale oo taakulo ah ama maalgalin ah. |
| 14 | **La wareegid Hanti** | Waxaa loola jeedaa hanti nooca ay doontaba ha noqotee, in qof ama koox argagixiso ah lahaanshiyaheeda laga wareejiyo dhammaanteed ama qaarkeed, laguna wareejiyo dawladda, si waafaqsan go'aan maxkamadeed. |
| 15 | **Xayiraad ku meel gaar ah** | Waxaa loola jeedaa xayiraad hanti nooca ay doonto ha noqotee muddo cayiman ah inta ay xaqiijintu ama maxkamadeyntu socoto, si aan loo isticmaalin ama loo wareejin ama loo dhalan rogin si waafaqsan go'aanka maxkamadda awooda u leh. |
| 16 | **Hanti** | Waxaa loola jeedaa Hanti kasta oo guurto ama maguurto ah, sida: dhul, guryo, dhisme, dhul-beereed, gaadiid, xoolo, lacag caddaan ah, jeegag, saamiyo, curaar, warqadaha daynta iyo dukuminti kasta oo lahaansho muujinaya iyo lacagaha maalgashiga ku jira iwm. |
| 17 | **Gaadiid** | Waxaa loola jeedaa nooc kasta oo ka mid ah waxyaalaha dadka/Xamuulka qaada sida: Markab, Diyaarad, Tareen, Gaari ama nooc kasta oo wax lagu qaado. |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

| | | |
|---|---|---|
| 18 | **Da'yar** | Waxaa loola jeedaa qof kasta oo ka yar da'da 18 sano. |
| 19 | **Laamaha Amniga** | Waxaa loola jeedaa cid kasta oo ka shaqeysa amniga iyo xasiloonida Dawladda Puntland. |
| 20 | **Maxkamad** | Waxaa loola jeedaa maxkamadda awooda u leh qaadista dambiyada argagixisada oo ah Maxkamadaha Ciidanka Qalabka Sida. |
| 21 | **La socodka Adeegyada Isgaarsiinta** | Waxaa loola jeedaa qabashada, dhexgalka iyo hubinta dhammaan xiriirada isgaarsiineed ee la tuhunsan yahay in loo adeegsaday ama la adeegsan karo fal-argagixiso sida: dhageysiga hadallada taleefannada, daalacashada qoraallada iyo dhambaallada la isku weydaarsado mobaylada iyo baraha Bulshada. |
| 22 | **Sarkaal Amni** | Waxaa loola jeedaa cid kasta oo oggolaasho ka haysta hay'ad awood qaanuuni u leh bixinta oggolaasho sarkaal amni. |

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka xeerka la dagaalkanka argagixisadu waa: -

1. Ilaalinta nolosha, hantida iyo xorriyadda shacabka Puntland, iyadoo laga hortagayo falalka argagixisada ee khatarta ku ah nabadgelyada Puntland.
2. Helidda hannaan xeer oo wax looga qabto argagixisada.
3. Xoojinta awoodda hay'adaha ammaanka, baaritaanka, xarigga, kormeer iyo ka fal celin deg-deg ah ee falalka argagixisanimo.
4. Joojinta taageerada iyo maalgelinta argagixisada.
5. Xaqiijinta ilaalinta xuquuqda aadanaha xilliga lala dagaalamayo argagixisada.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

## Qodobka 4-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan fal-dambiyeedyada argagixisanimo ee ka dhaca deegannada iyo xuduudaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 5-aad
## Mabaadi'da Xeerka

1. Shareecada Islaamku waa sharciga dalka ugu sarreeya, waxaana reebban wixii xeer ah ee ka soo horjeeda sida ku cad Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 9-aad faqradiisa 4-aad.
2. Ilaalinta Amniga iyo xasiloonida bulshada Dawladda Puntland.
3. La dagaalanka cid kasta oo samaynaysa fal-argagixisnimo oo khalkhal gelinaya Amniga Dawladda Puntland.

## Qodobka 6-aad
## Fal Argagixiso

Waxaa loo aqoonsanayaa fal kasta oo ka mid ah waxyaabaha soo socda, markii loo sameeyo ujeeddo argagixisanimo awgeed: -

1. Dilid qof.
2. Curyaamin qof ama u geysasho dhaawac jireed oo halis ah.
3. Si ogaal ah u kicin rabshad ama abuurid arbushaad, iyadoo looga dan leeyahay in argagax bulshada lagu geliyo naftooda, xorriyadooda ama amnigooda laguna khatar gelinayo hantidoodana lagu burburinayo.
4. Hoggaaminta ama madax u noqoshada iyo isku duwidda koox argagixiso ah oo hubeysan ama aan hubaysnayn.
5. Ku qaadidda weerar hubaysan iyo waxyeelaynta ciidammada qalabka sida iyo kuwa amniga xarumahooda ama fadhiyadooda ujeedkuna yahay argagixisanimo.
6. Waxyeelaynta ama ku qaadid weerar hubaysan, ergooyinka diblomaasiga ah iyo gaadiidka ama xarumaha hay'adaha caalamiga ah ee Puntland ka shaqeeya ujeeddo Argagixisanimo awgeed.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND ★ STATE GENERAL SOLICITOR ★ المحامي العام للدولة

7. Waxyeelaynta xarumaha danta guud ama hay'adaha dawladda ama kaabayaasha guud iyo carqaladaynta dhammaan adeegyada dawladda ee asaasiga ah sida: waxbarashada, caafimaadka, biyaha, difaaca madaniga ah, isgaarsiinta, nidaamka kombuyuutarka, waddooyinka caamka ah, internetka, bangiyada, garoommada iyo dekadaha, iyadoo ujeeddadu tahay khalkhal gelinta amniga, xasilloonida guud iyo hannaanka nolosha.
8. Ku kicid afduub, xirasho, xorriyad ka qaadid qof iyo ka badan ama qaadasho baad lacageed, falalkaas oo ay ka dhalato in amniga dalka iyo wadajirka bulshada la khalkhal geliyo ama argagixisannimada la dhiirigeliyo.
9. Xoog kula wareegid ama afduubasho diyaarad, markab, doon, gaari iyo wax kasta oo ka mid ah gaadiidka dhulka, badda iyo cirka, si loo xaqiijiyo ujeeddo argagixiso.

## CUTUBKA 2-aad

## FAL DEMBIYEEDYADA ARGAGIXISANIMO IYO CIQAABTOODA

### Qodobka 7-aad

### Gelidda Fal-Argagaxiso

Qof kasta oo: -

1. Gala fal-argagaxiso ayna ka dhalato falkaas Dhimasho, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah.
2. Gala fal-argagixiso uuna ka dhasho dhaawac daran ama curyaanimo ama burbur hantiyeed oo baahsan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in ama xabsi adag oo aan ka yarayn shan iyo toban (15) sano.
3. Isku daya inuu galo ama qorsheeya fal-aragagxiso qaabka uu doonaba ha adeegsadee waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn toban (10) sano, iyadoo la eegayo hadba heerka waxyeello ee ka dhalan kartay falkaas haddii uu dhici lahaa.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

## Qodobka 8-aad

## Asaasidda iyo Xubin ka Noqoshada Koox ama Urur Argagixiso

1. Qofkii abuura, aasaasa, maamula ama hoggaamiya urur ama koox Argagixiso ah, si loo sameeyo mid ama qaar ka mid ah dembiyada argagixiso ee xeerkan ku cad, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah ama xabsi daa'in.
2. Qofkii xubin ka noqda urur ama koox argagixiso ah oo dalka ka jirta ama mid caalami ah oo Dawladda Puntland u aqoonsan tahay argagixiso, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn toban (10) sano kana badnayn labaatan (20) sano.
3. Qofkii xubin ka noqda urur ama koox argagixiso ah, islamarkaana tababbar ciidan, amni ama farsamo gaar ah ka qaata koox argagixiso ah, si ujeeddo argagixisanimo loo xaqiijiyo, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn shan iyo toban (15) sano.
4. Qofkii, qof kale ku khasba ama ku hoggaamiya inuu xubin ka noqdo ama hor-istaaga inuu ka soo baxo urur ama koox argagixiso ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in, haddiise khasabkaas ama diidmadaas ay ka dhalato dhimasho, ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho ah.

## Qodobka 9-aad

## Samaynta ama Isticmaalka Hubka ama Agab Lagu Fulinayo Fal-argagixisanimo

1. Qof kasta oo adeegsada, sameeya, haysta ama fududeeya hub leh awood uu wax ku dilo ama ku gaysto dhaawac daran ama burbur baahsan sida walxaha qarxa, holca, maaddo kiimikaal ah ama bayooloji ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in, iyadoo ujeeddadu tahay gelidda fal-argagixiso.
2. Haddiise, isticmaalka ama haysashada hubkaas ay ka dhalato dhimasho, ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho ah, haddii ujeedadu tahay gelidda fal-argagixiso.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 10-aad

## Fal argagixiso oo ah Qafaalasho iyo Xoog ku Haysasho Qof ama Dad

Qof kasta oo fal-argagixiso ah afduub ku gaysta, xoog ku haysta, xorriyadda ka qaada qof ama dad, si uu madax furasho ama dheef kaleba u helo, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban (10) illaa labaatan (20) sano, haddii falkaas ay ka dhalato dhaawac jireed ama curyaamin, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in, haddiise ay ka dhalato dhimasho, ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho ah.

## Qodobka 11-aad

## Bixin ama Qaadashada Tababbar Argagixiso

Qofkasta oo qof ama koox ku tababbara si toos ah ama si dadban, adeegsiga hub caadi ah ama aan caadi ahayn ama farsamooyin, xirfado, xeelado iyo wadiiqooyin dagaal ama isticmaalka shabakad isgaarsiineed oo elektoroonik ah, iyadoo waxyaabahaas dhammaantood ujeeddadoodu tahay in lagu fuliyo hawl aragagixiso, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban (10) ilaa labaatan (20) sano.

## Qodobka 12-aad

## Gabbaadsiinta & Qarinta Wax Lagu Fuliyey Fal-argagagixiso

Qof kasta oo:-

1. Si ula kac ah u qariya wax loo adeegsado fal argagixiso, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn toban (10) sano.
2. Si kas ah u baabi'iya, xada, qariya xog qoraal ah electoroonik ah oo fududayn karta in fal-argagixiso ah la kashifo ama caddayn noqon lahaa.
3. Isagoo og siiya qof argagixiso ah magangelyo, gabbaad, hawl-fududayn ama inuu fakado u fududeeya qof galay fal argagixiso, ka hor ama kadib qabashadiisa, sida faqradaha 2-aad iyo 3-aad ku xusan, waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 1-aad.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 13-aad

## Xayeysiinta Been Abuurka Ah Ee Afkaarta Urur Ama Koox Argagixiso ah

1. Qofkasta oo xayeysiiya ama faafiya afkaar argagixisanimo ama haysta agabka wax daabaca ama wax duuba oo loo isticmaalay ama loo dalbay in loo isticmaalo arrimahaas ama koox argagixiso ah u sameeya suurad wanaagsan ama dacaayad ama danaheeda difaacda, si toos ah ama si dadban, si oraah ah ama qoraal ah ama wadiiqo kaleba, iyadoo ujeeddadu tahay in uu caawiyo argagixisada, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya shan (5) ilaa toban (10) sano.
2. Qofkasta oo abuura, maamula mareeg, shabakad warbaahineed ama isgaarsiineed, si loogu faafiyo ama loogu baahiyo afkaar iyo dacaayad lagu taageerayo ama lagu sumcad wanaajinayo koox argagixiso ah ama lagu marin habaabinayo hay'adaha amniga iyo hab-sami socodka caddaaladda arrin ku saabsan dembi argagixiso.
3. Qofkasta oo si aan sharci ahayn u gala mareeg ay hay'ad dawladeed leedahay si uu u tiro ama u dhalan rogo ama u qaato xog ku jirta mareegta, ujeeddo argagixisanimo awgeed, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan (10) toban ilaa (15) shan iyo toban sano.

## Qodobka 14-aad

## Waajibnimada soo Gudbinta Xogaha ku Saabsan Falalka Argagixisada

Qof kasta oo:-

1. Ka war hela jiritaanka fal-argagixisanimo, ogaada diyaargarowga iyo diyaarinta fal caynkaas ah ama ay soo gaarto xog la xiriirta cidda falkaas ku hawlan oo aan soo war gelin hay'adaha ku shaqada leh islamarkaana ay suuragal u ahayd inuu soo gaarsiiyo, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn lix (6) bilood kana badnayn saddex (3) sano



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

2. Soo gudbiya xogta fal-argagixisanimo, waxaa waajib ah in aan la faafin xog kasta oo lagu aqoonsan karo, lalana wadaagi karin cid aan ahayn hay'adaha sharcigu u oggol yahay, cid kasta oo xogtiisa faafisa ama la wadaagta cid aan loogu tala-gelin, waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan.

## Qodobka 15-aad

## Shirqool iyo Abaabul Dembi Argagixisnimo.

Qof kasta oo gala ama qayb ka noqda heshiis shirqool lagu abaabulayo ujeeddadiisuna tahay in la sameeyo mid kamid ah dembiyada argagixiso ee ku cad xeerkan waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn todoba (7) sano.

## Qodobka 16-aad

## Ku Xadgudbid Shakhsi Diblomaasi ah

1. Qof kasta oo afduuba, xorriyada ka qaada ama xad-gudub gacan qaad gaarsiisan kula kaca shakhsi diblomaasi ah ama haysta xasaanad dawli ah ujeeddo argagixiso awgeed.
2. Qof kasta oo xoog ku gala ama isku daya inuu xoog ku waxyeeleeyo una gaysto xarumaha ama dhismayaasha hay'adaha diblomaasiga iyo Ururada caalamiga ah, si fal argagixiso ah.
3. Cid kasta oo ku xad gudba faqradaha 1-aad iyo 2-aad waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn shan iyo toban (15) ilaa labaatan iyo shan (25) sano.
4. Haddii xadgudubka ku xusan faqradaha 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan loo adeegsado hub ama qarax ama ay dhawr qof isla sameeyaan ama la adeegsado aqoonsi iyo labbis Ciidan Dawladeed ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daa'in, haddiise falkaas ay ka dhalato dhimasho, ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho ah.

## Qodobka 17-aad

## Ku Xadgudbid Xarumaha Dawladda

1. Qof kasta oo xoog ku gala, la wareega, weerara ama argagax gelin iyo hanjabaad ku sameeya xarumaha dawladda, ujeeddo argagixisanimo awgeed, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka yarayn labaatan (20) sano.
2. Haddii falkaas loo adeegsaday hub ama dhawr qof ay ka qayb qaateen ama burbur xoogan ka dhashay ama dembiiluhu ciidanka Amniga uu xoog isaga caabiyey, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daa'in.
3. Haddiise falkaas ay dhimasho ka dhalato, ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho ah.

## Qodobka 18-aad

## Kicin iyo ku Dhiirra-gelin Fal-argagixiso

Qof kasta oo kiciya qof kale ama ku dhiirri-geliya in uu qayb ka noqdo fal-argagixiso, falkaasina uusan gaarin inuu dhaco, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn shan (5) sano, kana badnayn toban (10) sano.

## Qodobka 19-aad

## Adeegsiga iyo Samaynta Labbis ama Aqoonsi Ciidan Dawladeed

Qof kasta oo ujeeddo argagixiso awgeed u soo dhoofsada, sameeya, haysta, iibsada ama xirta labbis u gooni ah ciidammada qalabka sida ama hay'adaha amniga ama adeegsada aqoonsi, calaamad ama astaan ciidan iyo qof kasta oo sameeya, been abuura aqoonsi dawladeed ama sheegta magac iyo mansab aanu lahayn, isla ujeeddada sare ku xusan waxaa lagu ciqaabayaa lix (6) illaa laba iyo toban (12) sano oo xabsi ah iyo lacag dhan soddon ($30,000) kun oo doolar ama Sh.so u dhigma.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 20-aad

## Gacan-siin iyo Hagidda Fulinta Fal-argagixiso

1. Qof kasta oo ku gacansiiya, caawiya, haya, u fududeeya ama khibrad ku biiriya qof ama koox fulinaysa fal-argagixiso ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban (10) ilaa labaatan (20) sano.
2. Haddii falkaas uu ka dhasho dhaawac culus ama burbur xooggan, ciqaabta caawiyaha ama hagaha, waxay noqonaysaa xabsi daa'in.
3. Haddiise falkaas dhimasho ka dhalato, ciqaabtu waa dil toogasho ah.

## Qodobka 21-aad

## Afduubka Gaadiidka Dhulka, Badda iyo Cirka

1. Qof kasta oo xoog kula wareega ama afduubta mid ka mid ah gaadiidka dhulka, badda iyo cirka, isagoo xaqiijinaya ujeeddo argagixiso, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban (10) ilaa labaatan (20) sano.
2. Haddii gaadiidka la afduubtay ay leeyihiin Ciidamada qalabka sida ama falkaas uu ka dhasho dhaawac ama burbur hantiyeed, ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daa'in.
3. Haddiise falkaas ay dhimasho ka dhalato, ciqaabtu waa dil toogasho ah.

## Qodobka 22-aad

## Maalgelinta Koox ama Qof Fal-argagixiso

Qof kasta oo qof, koox, ama urur argagixiso ah maalgeliya, si toos ah ama si dadban, ama siiya hub ama walax kale oo markii fal argagixiso loo adeegsado khatarna gelinaya nafta iyo hantida dadka ama dawladda, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in ama xabsi adag oo aan ka yarayn shan iyo labaatan (25) sano.

## Qodobka 23-aad

## Is-hortaag Caddaaladeed Fal-argagixiso

1. Qofkii si ula-kac ah u sameeya is-hortaag, tallaabo ama fal keeni kara in uu saamayn taban ku yeesho ama uu carqaladeeyo habsami u socodka caddaaladda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

2. Qof kasta oo sarkaal dawladeed ah oo ku lug leh dacwad socota oo xeerkani ku dabaqmayo, oo si ula-kac ah u sameeya wax ka mid ah arrimaha soo socda:
   b. Adeegsada ama isku daya inuu adeegsado xoog ama hanjabaad.
   t. Isku daya in uu joojiyo bixinta caddayn.
   j. Ku khasba inuu keeno caddayn been ah ama ka reeba inuu caddayn bixiyo faragelina ku sameeya caddaymaha si uu u carqaladeeyo hab-raaca dacwadda.
   x. Siiya wax-dheef ah qof ama ballan qaad u sameeya, si uu u carqaladeeyo habsami u socodka caddaaladda.
   Kh. Qariya ama gabbaad siiya qof lagu tuhunsan yahay argagixisanimo.
3. Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo aan ka badnayn toban (10) ilaa shan iyo toban (15) sano iyo ganaax lacageed oo u dhexeeya toban ($10,000) kun ilaa labaatan ($20,000) kun, ama Sh.so u dhiganta iyo in uusan wax xil ah ka qaban karin dalka, midka uu hayana laga qaado markay ku caddaato is-hortaag caddaaladeed.

## Qodobka 24-aad
## Xog Uruurin iyo Basaasnimo

1. Qof kasta oo uruuriya, keydiya ama gudbiya, xog si loogu adeegsado diyaarinta ama sameynta fal-argagixiso markay ku caddaato, waxaa lagu ciqaabayaa toban (10) sano oo xabsi ah.
2. Qofkii xiriir basaasnimo la yeesha dawlad, hay'ad, urur ama koox ajnabi ah, si loo maleego ama loo fuliyo fal argagixiso oo ka dhan ah Dawladda Puntland, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya todoba (7) illaa toban iyo labo (12) sano.
3. Haddiise falka argagixisanimo ee ku xusan faqradaha hore, ka dhalato dhimasho ciqaabtiisu waa xabsi daa'in.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 25-aad

## Xad-gudubyada ka Dhanka ah Badbaadada Gegooyinka Diyaaradaha

Qof kasta oo si ula kac ah halis u geliya badbaadada garoon diyaaradeed oo rayid ah, isagoo adeegsanaya qalab, hub ama maaddo, kuna kaca mid ka mid ah arrimaha soo socda:-

1. Burburınta iyo waxyeelaynta agab uu leeyahay garoon diyaaradeed oo u adeegaya duulimaadyo caalami ah ama khalkhal gelinta badbaadada garoon bixiya adeeg duulimaadyo rayid ah oo la xiriira fal-argagixiso.
2. Xad-gudub iyo qalalaase kula kaca qof ku sugan garoon diyaaradeed oo u adeegaya duulimaadyo rayid ah, kaasoo keeni kara dhaawac ama dhimasho la xiriira fal-argagixiso haddii falkaas dhimasho ka timaado, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah.
3. Cid kasta oo ku xad-gudubta faqradaha qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi adag oo u dhaxeeya toban (10) illaa shan iyo toban (15) sano.

## Qodobka 26-aad

## Qaadidda Tallaabooyin Maamul

Mar kasta oo uu dhaco xukun eedayn fal-argagixiso ah, Maxkamadda awoodda u leh waxaa u furan in ay qaaddo tallaabooyinka soo socda:-

1. Dadka ajaanibta ah ee lagu helo dembi argagixiso waa in waddanka laga masaafuriyo, kadib markii ay ciqaabtooda dhammaystaan, haddii iskaashi noocaas ah uu jiro.
2. In dadka argagixisada iska soo dhiibay ee la cafiyey ama kuwa ciqaabtoodii dhammaystay lagu waajibiyo in ay degaan meel cayiman ama ay joogaan wakhtiyo xaddidan meelo loo cayimay lagana reebo in ay tagaan meel kale.
3. In laga reebo in ay adeegsadaan wadiiqo isgaarsiin cayiman.
4. In lagu waajibiyo inuu ka qayb qaato tababar dhaqan celin ah.
5. Marka laga reebo tallaabada faqradda 1-aad ku xusan muddada tallaabada maamul kama badnaan karto shan (5) sano.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

6. Qofkii khilaafa amarrada sare ku xusan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka badnayn hal (1) sano.

## Qodobka 27-aad
## Saamaxaad

1. Qof kasta oo ka hara falalka argagixisada, oo si iskii ah isku soo dhiiba, Hay'adaha amniguna soo diiwaan-geliyaan wuxuu xaq u yeelanayaa saamaxaad, marka laga reebo kuwa loo aqoonsan yahay in ay ka mid yihiin argagixisada caalamiga ah.
2. Qof kasta oo loo sameeyo saamaxaad sida ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan waxaa loo dirayaa dhaqan celin muddo hal (1) sano ah.

# CUTUBKA 3-aad
# QABASHADA, LA WAREEGIDDA IYO XAYIRIDDA HANTI ARGAGIXISO

## Qodobka 28-aad
## Xayiraad Saarid Hantiyeed

1. Xafiiska Xeer-ilaalintu waxay maxkamadda awood u leh weydiisan karaan in ay xayiraad saarto muddo kooban, dhaqdhaqaaqa hanti looga shakiyey wax la xiriira argagixisanimo.
2. Cid kasta oo go'aanka xayiraadu saamayso ama dhibbane u noqota waxaa u furan in ay maxkamadda weydiisato in xayiraadda laga qaado hantidiisa, haddii ay caddaato in tallaabo khaldan la qaaday. Amarka xayiraadda waxaa la ogaysiinayaa:-
   b. Bangiyada, hay'adaha maaliyadda iyo kuwa ka ganacsada lacagaha caddaanka ah.
   t. Cid kasta oo kale, oo dan sharci ugu jirto ama ay saamayn ku yeelanayso xayiraadu.

## Qodobka 29-aad

## La-wareegid Hanti Argagixiso

Iyadoo aan waxba loo dhimin xuquuqda cid kale oo niyadsan, haddii si waafaqsan xeerkan dacwad argagixisnimo loogu soo oogo markasta oo ay Maxkamaddu fal-dembiyeedkaas ka soo saarto xukun kama dambays ah, ayna ciqaabta u dagsan xukunto, waxay kaloo xukumaysaa:

1. In lala wareego dhammaan hanti kasta oo loo adeegsaday fal argagixisanimo, fududayntiisa ama ay sugnaatay sababtiisa in lagu helay, xataa haddii hantidaasi cid kale ku wareegtay ama sidii ay markii hore ahayd laga dhalan rogay.
2. In lala wareego dhammaan guryaha, gaadiidka, hubka, agabka, walxaha qarxa iyo maaddo kasta oo la adeegsaday ama ay muuqatay in la adeegsan lahaa.
3. Si fal- dembiyeedkaas loo sameeyo ama loo fududeeyo iyo dhammaan waxyaabaha samayntooda, haysashadooda, adeegsigooda ama ka ganacsigooda fal argagixiso laga samaynayo.
4. In lala wareego dhammaan hanti kasta oo uu leeyahay ama uu maamulo, loona hayo ama loo uruuriyey qof, koox ama urur argagixiso ah.
5. Haddii ay suuragal noqon weydo in hantidaas la qabto, waxay maxkamaddu xukumaysaa ganaax lacageed oo u dhigma hantidaas.
6. Cid kasta oo dhibbane u noqota ama ay dani ugu jirto hantida la xukumay in lala wareego, waxaa u furan in ay rafcaan qaadato, si loo baajiyo go'aanka Maxkamadda, muddo sodon (30) maalmood gudahood ah oo ka bilaabanaysa maalinta xukunka la riday.
7. Haddii aan cid kale oo sheeganaysa aysan ka qaadan rafcaan sida ku xusan faqrada 6-aad ee qodobkan ama uu dhaco xukun maxkamdeed oo kama dambeys ah hantidaas waxaa yeelanaya dawladda.
8. Hanti muwaadin leeyahay ee lagu qabto faldembiyeed argagaxiso waa loo celinayaa, haddii ay caddaato in uusan waxba ka ogeyn faldembiyeedka lagu galay.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 4-aad

# ASTEYNTA ARGAGIXISADA

## Qodobka 30-aad

## Habraaca Astaynta Shaqsi ama Urur Argagixiso

1. Wasaaraddu iyadoo ka ambaqaadaysa warbixinnada laamaha Amniga, kaashanaysana hay'adaha la dagaalanka argagixisada, waxay diyaarinaysaa liiska kooxaha, ururrada iyo shakhsiyaadka argagixsada lagu tuhmay, isagoo sababaysan ayna la socoto caddaymaha loo hayo oo ku filan.
2. Wasaaraddu waxay u gudbineysaa Golaha xukuumadda, kadibna Golaha xukuumadda ayaa go'aan ku soo saaraya liiska kooxaha, ururrada iyo shakhsiyaadka argagixisada ah.
3. Ururrada, kooxaha, hay'adaha iyo shakhsiyaadka lagu asteeyey argagixisannimada ama liiska argagixisnimo lagu daray iyo cid kasta oo dhibbane u noqota astayntaas, waxaa u furan in muddo soddon (30) maalmood gudahood ah ay maxkamadda awooda u leh rafcaan u qaataan.
4. Xeer-ilaalinta iyo maxkamadaha awooda u leh ayaa waajiibkooda ka gudanaya liiska argagxisanimo, si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 31-aad

## Ka Saaris Liis Argagixisnimo

Marka liiska argagixisanimo laga saarayo koox, urur ama shakhsi, waxaa la qaadayaa tallaabooyinkan soo socda:-

1. Wasaaraddu haddii ay ku qanacdo ama ay tahay in koox, urur ama shakhsi laga saaro liiska argagixisanimo, sababo macquul ah oo soo kordhay awgood, waxay wasaaraddu u soo jeedinaysaa Golaha xukuumadda codsi sababaysan.
2. Golaha xukuumadda ayaana go'aan ka soo saaraya.
3. Goluhu wuxuu sanadkiiba mar ama markii loo baahdo, dib u eegis ku samaynayaa liisaska argagixisanimada.



CARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

4. Maxkamadda awoodda u leh ayaa amri karta in koox, shaqsi ama urur laga saaro liiska argagixisanimada marka uu guuleysto rafcaanka ay ka qaateen ku darista liiska.
5. Cid kasta oo lagu asteeyey ama la galiyey liis argagixisanimo, ayna dib ka caddaato in aysan asaas u ahayn tuhunka keenay in lagu daro liiska, ayna ka soo gaarto waxyeelo sharafeed ama hantiyeed, wuxuu xaq u yeelanayaa raali-gelin iyo magdhaw u dhigma dhibaatada gaartay oo ay bixiso Dawladdu.

# CUTUBKA 5-aad

# AWOODDA DACWAD QAADISTA

## Qodobka 32-aad

## Maxkamadda Awoodda u Leh Qaadidda Dacwadaha

Maxkamadaha Ciidamada Qalabka Sida ayaa yeelanaysa awoodda qaadista dacwadaha ka dhasha dembiyada argagixisada ee xeerkani caddeynayo, waxaana Maxkamadaas ka hawlgalaya garsoorayaal, kaaliyeyaal iyo howl-wadeenno si gooni ah ugu tababbaran arrimaha la dagaalanka argagixisada.

## Qodobka 33-aad

## Dacwad Oogaha

Xeer ilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka-sida ayaa yeelanaysa oogista, dhaqaajinta baarista, kormeerka iyo dacwadaha argagixisada, Xeer ilaalintaasna waxaa ka hawlgalaya xeer ilaaliyaal, baarayaal iyo kaaliyayaal si gaar ah ugu tababbaran arrimaha la dagaalanka argagixisada.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## CUTUBKA 6-aad

## AWOODAHA BAARISTA, CADEYMAHA & WAARANKA

### Qodobka 34-aad

### Qabasho iyo Baaris Waaran la'aan

1. Qabashada qof ama dad lagu tuhmay argagixisanimo, waxaa samayn kara dhammaan Ciidamada Amniga ee u xil saaran sugidda Amniga.
2. Awoodda xirista iyo baarista qof ama dad markii ay jirto sabab cad oo maangal ah oo lagu tuhmo in uu galay ama isku dayo in uu galo fal-argagixiso, waxaa leh Saraakiisha Nabadsugidda iyo Booliska.
3. Cid kasta oo qabata qofka tuhmanaha ah waa in ay ku wareejiso hay'adaha ku shaqada leh.
4. Eedaysanaha waa in la horgeeyaa Maxkamadda ku shaqada leh ama loo helaa xabsi xalaalayn muddo aan ka badnayn afartan iyo siddeed (48) saacadood, sida ku cad Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 27-aad faqradiisa 4-aad.
5. Saraakiisha dembi baaristu waxay geli karaan oo baaritaan ku samayn karaan waaran la'aan guriga ama meesha uu ku nool yahay qofka la tuhmay, waase in hay'adaha ku shaqada leh lagu wargeliyo muddo aan ka badnayn afartan iyo siddeed (48) saacadood gudahood, kadib markii baaritaanku dhammaado.

### Qodobka 35 aad

### Awoodda Xirista iyo Sii Dayntа

1. Qof kasta oo awood xeerkani bixiyey lagu qabto, waa in la hor keenaa maxkamadda awoodda u leh muddo afartan iyo siddeed (48) saacadood gudahood ah.
2. Marka qofka la tuhunsan yahay la hor keeno maxkamadda, sarkaalka Amnigu wuxuu u gudbin doonaa cidda ku shaqada leh warbixin kooban oo muujinaysa:-
   - b. Xaqiiqooyinka iyo sababaha xarigga.
   - t. Caddaymaha la hayo iyo tilmaanta guud oo ku saabsan baarista la sameeyey.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

j. Sababaha lama huraanka ka dhigaya in la sameeyo muddo kordhin baariseed, si la tuhunsanaha loogu sii hayo xarunta baarista.

x. Tallaabo kasta oo la qaado hab waafaqsan arrimaha qodobkan ku xusan, waxaa sida ugu dhakhsiyaha badan lagu wargelinayaa Xafiiska Xeer-ilaalinta ku shaqada leh iyo sarkaalka qofka xiran u soo gudbiyey garsoorka.

## Qodobka 36-aad
## Xarigga iyo Xabsi ku Haynta

1. Maxkamadda qofka xiran la horkeenay hab waafaqsan xeerkan, waxay amri kartaa xabsi ku hayn ku meel-gaar ah si qofka la tuhunsan yahay loogu sameeyo baaris ka hor inta aan dacwad lagu soo oogin.
2. Muddada Xabsi ku haynta ka hor Maxkamadaynta waxaa loo raacayaa Qodobka 47-aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.
3. Markii aanay jirin sababo macquul ah oo lagu aammino in qofka la tuhunsan yahay ku kacay ama ku lug lahaa fal-argagixiso, isla markaana aanay jirin dacwad lagu soo oogay ama codsi muddo kordhin ah muddo saddex (3) bilood gudahood ah, laga soo bilaabo taariikhda amarka xarigga, Maxkamaddu waxay amri kartaa sii dayntiisa.
4. Xaalad ama sabab kasta oo aan xeerkan la jaanqaadayn eedaysanaha lama hayn karo muddo ka badan mida lagu xusay farqada 3-aad ee qodobkan, iyadoo lagu soo oogin wax dacwad ah, laga bilaabo markii la soo xiray.

## Qodobka 37-aad
## Baarista Gaadiidka iyo Rakaabka Saaran

Saraakiisha Hay'adaha Amniga ayaa awood u leh in la hakiyo lana baaro baabuurta, rakaabka iyo wax kasta oo saaran ama ku rakiban gaadiidka.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 38-aad

## Baaritaanka Dadka Lugaynaya

Awooddaha baaritaanka ku xusan xeerkan, waxaa iska leh sarkaal kasta oo ka tirsan Hay'adaha Amniga, kaasoo awood u leh in uu joojiyo qof ama dad lugaynaya meel gaar ah ama aag si gaar ah loo xusay iyo in la baaro wax kasta oo abuuri kara shaki argagixiso.

## Qodobka 39-aad

## Oggolaanshaha, Caddeymaha Elektroonigga Iyo Hababka Casriga ah

Habraac ama fal-dembiyeed kasta oo ku saabsan xeerkan caddeymaha danabeysan ama daabacan sida: muuqaallada, sawirrada, codadka, qoraallada, tixraacyada xiriirka la leh tiknoolajiyada IWM marka ay Saraakiisha dambi baaristu hubin dhammaystiran ku sameeyaan, isla markaana ay xaqiijiyaan caddeymaha noocaas ah, garsoorku waa in uu u tix-geliyo in ay yihiin caddeymo marag muujinno oo go'aan garsoor lagu qaadan karo.

## Qodobka 40-aad

## Oggolaanshaha Guud ee Adeegsiga Nuqullada

1. Habraac ama fal-dembiyeed kasta ee ku saabsan xeerkan, dukumenti kasta oo loo oggolaan karo in uu caddeyn galo marka la soo saaro, nuqul kasta ama wax kasta oo laga soo dheegtay dukumintigaasi wuxuu noqon karaa mid caddeyn gala.
2. Nuqulka la hubiyey waa inuu saxiixay oo caddeeyey dhabnimadiisa sarkaalka nuqulka asalka ah lagu aaminay, isla markaana looga baahan yahay sarkaalkaas in uu siiyo nuqul la caddeeyey hay'daha garsoorka oo kali ah marka ay u baahdaan.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 41-aad

## Caddeyn Markhaati-Khabiir

1. Sida ku cad qodobbada 157-aad ilaa 161-aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed ee la xiriira aragtida khabiirka, dacwad kasta oo la xiriirta arrimaha argagixisada oo ay su'aal ka timaado in shay ama walxaha sida: hub, shucaac, kiimiko, bayoolaji ama sun ah.
2. Wixii halis ah oo la mid ah walxaha la soo sheegay, qofka khabiirka ah, waxaa khasab ku ah inuu si qarsoodi ah u bixiyo xogta looga baahdo.
3. Caddeyntaasi waxay noqon doontaa mid la oggolaado, iyadoo aan u baahnayn saxiix ama mas'uul awoodda qofka ama in qofkaasi saxiixay hor yimaado maxkamadda, haddii aysan jirin caddayn kale oo ka soo horjeeda oo loo tixgeliyo caddeyn ku filan.

## Qodobka 42-aad

## Ilaalinta Markhaatiga

1. Xog walba oo lagu aqoonsan karo markhaatiga marka lagu jiro garmaqal ciqaab ah oo la xiriira fal-dambiyeedka argagixisinimo lama faafin karo, iyadoo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan markhaatiga.
2. Haddii aanu markhaatigu bixin oggolaanshaha lagu sheegay faqrada 1-aad waa in:-
   - b. La ilaaliyo Magaciisa/magaceeda.
   - t. Xog walba oo kashifi karta markhaatiga ay ogaadaan laamaha Amniga, Xeer ilaalinta iyo Maxkamadda oo kaliya.
   - j. Dokuminti kasta oo ka mid ah galka kiiska magaca markhaatiga lagu beddelaa magac qarsoon.
   - x. Galka kiiska aan laga helin wax xog ah oo kashifi karta hiwaayaddiisa shakhsiyaddiisa.
3. Marka Markhaatigu marag furayo waxaa la samaynayaa hababka soo socda midda ugu habboon oo loo qarin karo:-

i. Markhaatiga oo shaashad gadaal laga mariyo si aan loo aqoonsan.
ii. Markhaatiga oo la geeyo meel fog lagana dhegaysto fogaan arag la gujiyo.
iii. Markhaatiga oo la geeyo meel fog oo ay la socdaan sawiro ama codkiisa oola beddelay.

4. Waa in aan la oggolaan su'aalaha kashifi kara shaqsiyadda qofka markhaatiga ah inta lagu guda jiro garmaqalka maxkamadda.
5. Maxkamaddu waxay garmaqalka ku dhegaysan kartaa meel ka baxsan maxkamadda, si loo xifdiyo qofka markhaatiga bixinaya.
6. Meel kasta oo markhaatiga lagu dhegaysanayo, waa inuu goob-joog ahaado, arkaana qareenka sharciga ah ee eedaysanuhu, wuxuuna su'aalo ka weydiin karaa caddeymaha ama xogta uu soo bandhigo markhaatigu.

## Qodobka 43-aad

## Xafidaadda Caddeymaha Baaritaanka

Qofka mas'uulka ka ah baaritaanka wuxuu qabanayaa wax kasta oo loo arko in fal-argagixiso loo isticmaali karo, waxaana walxaha la qabtay oo laga shakiyey lagu wareejinayaa xarunta baarista ee ay raacsan tahay cidda baarista samaysay, iyadoo warbixin dhammaystiran la raacsiinayo oo ku saabsan sababaha shakiga abuuray.

## Qodobka 44-aad

## La Socodka Adeegga Isgaarsiinta

1. Markii maxkamadda awoodda u leh loo soo gudbiyo codsi ku saabsan la socodka adeegga isgaarsiinta ayna maxkamaddu ku qanacdo maan-galnimada codsigaas, waxaa la bixinayaa oggolaansho lagu fasaxayo ama lagu farayo qofka, shirkadda, ama hay'adda ay ku socoto inay hubiso mid ama ka badan arrimaha soo socda:-
   b. La socod la sameeyo inta uu socdo xiriirka loo adeegsanayo nidaam isgaarsiineed xiriirka ku tilmaaman oggolaanshaha.
   t. Bixinta kaalmo loo samaynayo dal soo codsaday in laga caawiyo in la socod lagu sameeyo xiriir isgaarsiineed sida ku xusan heshiiska caalamiga ah.

j. Wax kasta oo lagu helay dhexgal la oggolaaday ama lagu dalbay oggolaashaha dhexgal xog xiriirkeedu yahay nooc kasta ah.

2. Haddii deg-deg loogu baahdo la socod ama dhexgal, waxaa dalbashada saxiixaya Taliyaha Hay'ada Nabadsugidda, iyadoo codsiga lagu muujinayo sababta degdeg ka dhigaysa codsiga waa in uu Afar iyo labaatan (24) saac gudahood ay ku oggolaato maxkamadda awoodda u leh.

3. Haddii aysan maxkamaddu oggolaan marka oggolaanshaha la weydiisto muddo dhan afar iyo labaatan (24) saac gudahood, caddeymaha lagu helay la socodkaas ama dhexgalkaas looma isticmaali karo caddeymo ahaan maxkamadda horteeda.

4. Garsooruhu ma bixinayo oggolaanshaha ku xusan farqada 1-aad iyo 2-aad haddii aanu ku qanacsanayn xogta iyo caddaymaha loo soo gudbiyey waa in oggolaanshuhu uu danaynayo Amniga Dawladda Puntland ama loo adeegsanayo ka hortaga:-

   b. Oggolaashaha dambiyo halis ah ama leh ujeeddo lagu ilaalinayo danaha Dawladda Puntland.

   t. In waxa lagu oggolaaday ama oggolaanshuhu noqdo mid u qalma wixii la rabay in lagu gaaro.

5. Xog dhawrsan oo lagu helay dhexgal ama la socodka sharci ah oo la xiriira waxyaaba qarsoodiga u ah qof, waa in ay ahaadaan kuwa dhawrsan oo aan la faafin karin, loona adeegsan karin ujeeddo ka baxsan middii oggolaashaha lagu helay.

6. Oggolaansho dhexgal isgaarsiineed waxaa lagu bixin karaa oo keliya haddii mas'uuliiinta hay'adaha Amniga magacooda lagu soo codsado.

7. Codsiga waa in lagu qeexo tilmaanta xiriirrada la rabo in dhexgal ama la socod lagu sameeyo, faah-faahinta cidda adeegga isgaarsiinta bixisa iyo sharraxaad ku saabsan sababta dhexgalkaasi muhiim u yahay codsiga waa in lagu daro ballanqaad ah in wixii xog ah ee lagu helo dhexgalka ama la socodka loola macaamilayo hab waafaqsan xeerkan.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
النائب العام للدولة

8. Haddii nuqul oggolaanshahaas ah loo geeyo qofka ku xusan oggolaanshaha, wuxuu u geyn karaa cidda la is-leeyahay gacan ayey ka geysan kartaa arrinta.
9. Waxay noqonaysaa mas'uuliyadda qofka ama hay'adda oggolaanshaha la siiyey inuu qaado tallaabooyin lagu dhaqan-gelinayo oggolaanshahaas hadba sida suurtagalka ah.
10. Adeeg bixiyayaasha waxaa waajib ku ah in ay gacan siiyaan saraakiisha sharci fulinta, ayna oggolaadaan taageero farsamo, marka saraakiishu la timaado amarka maxkamadda ama Taliyaha Nabadsugidda haddii xaaladdu deg-deg tahay sida ku xusan farqada 2-aad ee qodobkan.
11. Oggolaanshaha dhexgalka ama la socodka wuxuu shaqaynayaa muddo saddex (3) bilood oo keli ah, waana in todoba (7) beri oo kasta hay'adaha baarista lagu celiyo meesha baaristu marayso, waxayna ku dari karta saddex (3) bilood oo laba jeer ah, haddii codsi ay hesho, kadib markii ay maxkamaddu ku qanacdo in kordhinta la codsaday ay tahay mid muhiim u ah baarista.
12. Waxay noqonaysaa mas'uuliyadda codsadaha in uu hubiyo:-
    b. Tirada dadka xogta la helay la tusay ama loo daah-furay.
    t. Ilaa xadka xogta la helay la baahiyey ama la wadaagay.
    j. Lagu koobo inta ugu yar ee u muhiimka ah ujeeddadii loo oggolaaday, isla marka xogtaa la ururiyey ay dhaafto goortii ay muhiimka ahayd, waa in la baabi'iyo nuqul kasta lana tirtiro.
13. Codsadaha kama saarna in uu buuxiyo shuruudaha ku xusan farqada 1-aad (b) iyo (j) haddii lagu wareejiyo xog dawlado shisheeye iyo hay'ado Amni ee caalami ah laga helay, wuxuuse xil ka saaran yahay inuu fiiriyo in dawladahaas leeyihiin shuruudo noocaas ah iyo in ay leeyihiin dhawrsanaanshaha ku sugan faqradda 4-aad, marka la fiirinayo in loo daah-furo xogta dhexgalka loo galay maamulkaas shisheeye.
14. Xog kasta oo lagu helay dhexgal xiriirna la leh dacwad waxaa loo adeegsan karaa caddeyn ahaan maxkamadda horteeda.

15. Sarkaal baaris ama qofkii kale oo faafiya xog dhowrsan wuxuu galayaa fal-dembiyeed, wuxuuna mutaysanayaa ciqaab si waafaqsan qawaaniinta Puntland.

## Qodobka 45-aad
## Qaadista Astaamaha Faraha Iyo Muunadaha

1. Markii loo baahdo maxkamadaynta awgeed, eedaysanaha waxaa laga qaadi karaa;- Foreensig Sayniska, raadka iyo muunadda faraha, dheecaanka, dhiigga, timaha, cidiyaha iyo dhammaan raadadka iyo muunadaha laga qaado ama uu reebo qeyb kasta oo jirka aadanaha ka mid ah, isla markaana waxaa loo tixgelinayaa marag-muujin ahaan.
2. Haddii qofka xiran aanu ahayn qof qaan-gaar ah si waafaqsan Xeerka da'yarta Puntland, waa in maxkamadda laga helo oggolaansho gaar ah.
3. Qofka la tuhunsan yahay waa in lagu wargeliyo in muunadda laga qaadayo loo adeegsan doono baaris fal-dembiyeed ama caddayn ahaan.
4. Muunad kasta oo laga qaadayo qof eedaysane ama tuhumane ah waa in uu qaadaa qof xirfad u leh una idman.
5. Raadadka ama muunadaha loo qaaday si waafaqsan qodobkan iyo xog kasta oo laga helay waa la haynayaa, cidina uma adeegsan karto ujeeddo ka duwan baarista argagixiso.

## Qodobka 46-aad
## Hubinta Dekadaha, Garoomada iyo Xudduudaha

1. Haddii qof ku lug leh ama lagu tuhmay fal-argagixiso ama fududeynta fal-aragagixiso oo ku sugan dekad, garoon diyaaradeed, meel xad ah, markab dushiis ama diyaarad dusheed, saraakiisha Amnigu waxay awood u leeyihiin inay tuhmanaha la yeeshaan wareysi baariseed ama in tuhmanahaba la qabto.
2. Qofkuu wareystay Sarkaalka Amni, waxaa waajib ku ah inuu;-
   b. Siiyo Sarkaalka Amniga xogta ama xog dukuminti kasta oo uu hayo ee sarkaalkaasi codsaday.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

t. Siiyo Sarkaalka Amniga marka uu codsado baasaboor shaqeynaya oo sawir wata ama xog dukuminti kale oo sugaya aqoonsigiisa.

3. Qofka uu qabtay Sarkaalka Amni, haddii aan dambi kale lagu xirin, waxaa lagu sii daynayaa muddo aan ka badnayn Siddeed iyo afartan (48) saacadood marka laga billaabo wakhtigii hubintiisu bilaabantay.

4. Sarkaalka Amnigu wuxuu awood u leeyahay inuu baaris ku sameeyo markab, diyaarad wixii saaran ama wax kasta oo uu rumaysan yahay inay markabka ama diyaaradda saaran yihiin.

5. Sarkaalka baaraha ah ee su'aalaha weydiinaya qof si uu u go'aamiyo inuu yahay qofka ku lug lahaa diyaarinta, fulinta iyo fududaynta falka argagixiso, wuxuu baaris dhammaystiran ku sameyn karaa wax kasta oo qofka u saaran ama la saarayo diyaaradda ama markabka:-

   b. Alaabta uu qabto ama ka shakiyo sarkaalka baarista wuxuu hayn karaa muddo aan ka badnayn toddoba (7) maalmood oo ka billaabanaysa maalinta la qabtay alaabta.

   t. Qofka wuxuu noqonayaa mid xad-gudub sameeyey haddii uu si ula kac ah u horjoogsado ama u carqaladeeyo baarista ama hubinta ku sugan qodobkan, wuxuuna noqonayaa mid mutaysta ciqaab xabsi oo gaareysa lix (6) bilood ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun ($2000) oo dollar ama SH.SO u dhigma.

## CUTUBKA 7-aad
## ISKAASHIGA CAALAMIGA AH EE ARRIMAHA DEMBIYADA ARGAGIXISADA LA XIRIIRA

### Qodobka 47-aad

### Iskaashiga Dalalka kale Arrimaha Dembiyada Argagixisada

1. Dawladda Puntland waxay la shaqeynaysaa dalalka kale xagga iskaashiga macluumaadka, qabashada, baaritaanka, dacwad ku qaadidda la xiriirta dembiyada argagixisada ee xuduudaha ka tallaaba, iyadoo ujeeddadu tahay in si



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

ku meel gaar ah loo qabto tuhmanayaasha sababo amni dartood, la wareegidda hantida, lacagaha, hantida la xiriirta lacagta la dhaqay, maalgelinta argagixisada, isu-celinta iyo iskaashiga farsamo.

2. Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobbada heshiisyada iyo axdiyada caalamiga ah ee ku aadan is-dhaafsiga dembiilayaasha, garsoorka dawladda Puntland, wuxuu arrimaha dembiyada argagixisada khuseeya iskaashi iyo xiriir kala yeelanayaa dhinacyada garsoorka shisheeye, isagoo raacaya qodobbada xeerkan.

## Qodobka 48-aad
## Ujeeddada Codsiga Iskaashiga

Codsiga Iskaashi ee xeerkan ee dhex maraya labada dhinac lana xiriira dembiyada ku xusan xeerkan, waa in loo fuliyaa si waafaqsan mabaadi'da lagu qeexay xeerkan. Iskaashiga waxaa ka mid noqon kara:-

1. Ururinta caddaymaha iyo macluumaadka dadka iyo oggolaansho in lala kulmo dadka baaritaanku ku socdo, si loola socdo qaabka baaritaanku u dhacayo.
2. Bixinta xog dukuminti kasta oo garsoor iyo fulinta baaritaannada iyo la wareegidda hantida iyo walxaha kale.
3. Baarista walxaha iyo tagidda goobaha bixinta macluumaadka iyo wixii caddaymo ah.
4. Bixinta xogta dukumintiga asalka ah iyo nuqullada oo ay ku jiraan dukumintiyada rasmiga ah, warqadaha bangiga, waraaqaha xisaabaadka iyo diiwaannada muujinaya hawlaha ganacsi.

## Qodobka 49-aad
## Diididda Codsiga Iskaashiga

Codsiga wada shaqaynta waxa kaliya oo la diidi karaa marka:-

1. Ay u badan tahay inay wax u dhimayso nidaamka dowliga ah.
2. Hay'adda codsanaysa oo aan ahayn mid awood qaanuun u leh inay codsiga soo gudbiso, marka la raaco xeerarka dalka codsanaya.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

3. Xaqiiqooyinka codsigu ku salaysan yahay oo maxkamad awood u leh ay horay si kama dambays ah go'aan uga gaartay.

## Qodobka 50-aad
## Codsi Soo Gacan-gelin Eedaysane

1. Codsiyada isu gacan-gelinta dadka la raadinayo ee ka yimaada dalalka shisheeye oo khuseeya dembiyada xeerkani daboolayo ama hirgelinaya go'aanno garsoor oo dembiyadaas la xiriira, nidaamyada iyo mabaadi'da lagu sheegay heshiiska isu gacan gelinta oo dhaqangal ah oo u dhexeeya dawladda codsiga soo gudbisay iyo dawladda Puntland ayaa la dabaqayaa.
2. Haddii uusan jirin heshiis isku gacan-gelin sida ku xusan farqada 1-aad isu- celinta waa in la fuliyo, iyadoo lagu salaynayo xiriirka wanaagsan ee Puntland ka dhexeeyo dalka codsiga soo gudbiyey haddii loo baahdo.
3. Sida ku cad shuruudaha xeerkan isku gacan-gelinta dambiilayaasha waa in la hirgeliyo keliya marka dembiga keenay codsiga isu gacan-gelinta uu dembi ka yahay labada xeer ee dalka codsanaya iyo Puntland.

## Qodobka 51-aad
## Sababaha Lagu Diidi Karo Gacan Gelin Eedaysane

1. Qofka codsiga isu gacan gelinta lagu dalbanayo waa inuu yahay qof reer Puntland ah.
2. Waa in ay jiraan sababo maangal ah oo la aamini karo, in sababta qofka loo dacweynayo ama loo ciqaabayo ay tahay sababo la xiriira isirkiisa, diintiisa, dhalashadiisa, asalkiisa, fikradiisa siyaasadeed, jinsigiisa, ama nafta qofkaasi in laga yaabo in ay khatar gasho sababahaas awgood.

## Qodobka 52-aad

## Xuquuqda Eedaysanaha

1. Qof kasta oo lagu tuhunsan yahay inuu ku lug leeyahay argagixiso wuxuu xaq u leeyahay:-
   b. In lagu wargeliyo eedeynta lagu soo oogay luqad uu fahmayo.
   t. In uu helo garyaqaan difaaca xuquuqdiisa.
   j. In uu la xiriiro qoyskiisa iyo wakiilkiisa sharciyeed.
   x. In lagu xiro xarun rasmi ah oo la aqoonsan yahay.
2. Waa mamnuuc in eedaysanaha lagu khasbo inuu qirto dambiga, isagoo la cabburinayo ama lagu cadaadinayo.
3. Lama oggola jirdil, dhibaateyn maskaxeed iyo daryeel la'aan xilliga baaritaanka waana dambi ciqaab adag leh.
4. Qofna laguma eedayn karo ra'yi ama fikir uu qabo haddii aanu si toos ah ugu lug lahayn argagixiso.
5. Qofna laguma beegsan karo wax ku saleysan qabiil, diin, jinsi, ama aragti siyaasadeed.

## Qodobka 53-aad

## Da'yarta iyo Haweenka

1. Da'yarta iyo Haweenka lagu tuhunsan yahay ama ku lug yeeshay falal argagixiso waa in si gaar ah loo tix-geliyaa, isla markaana xabsigooda iyo baaritaankooduna ahaadaa mid waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka ee Puntland.

## Qodobka 54-aad

## Hawlgallada Gargaarka Bani'aadanimo

1. Hay'adaha Gargaarka Bani'aadanimo ee eex la'aanta ku shaqeeya si waafqasan Sharciga Caalamiga ah (IHL) ee sifo sharci ah uga shaqeeya goobaha ay saamaynta ku leeyihiin argagixisadu looma aqoonsan karo taageero argagixiso,



STATE GENERAL SOLICITOR PUNTLAND

lagumana eedayn karo, waana in aan la xannibin deeqahooda, dhaqaalahooda, ama shaqaalahooda.

2. Dawladdu waxay xaq u leedahay inay si taxaddar leh u baarto hay'adaha gargaarka haddii ay jirto tuhun cad oo muujinaya in gargaarka loo adeegsanayo taageero dad argagixiso ah.
3. Go'aan kasta oo xaddidaya hawlaha hay'adaha bani'aadanimo waa in uu noqdaa amar Maxkamadeed, loona hayaa caddeyn dhab ah.
4. Hay'adaha ammaanka iyo hay'adaha gargaarka waxay ku shaqaynayaan, wada-hadal, Isfahan iyo wargelin joogto ah oo labada dhinac ah, si looga fogaado khilaaf iyo ismaan-dhaaf.

## Qodobka 55-aad

## Kormeerka, Magdhow iyo Racfaan

1. Guddiga Amniga iyo Nabadgelyada ee Golaha Wakiillada iyo Xafiiska Difaacaha Xuquuqul Insaanka ayaa kormeeraya hab-dhaqanka hay'adaha fulinaya xeerkan iyo xarumaha lagu xiro dadka ku eedaysan falal Argagixiso
2. Qof kasta oo xadgudub ka soo gaaro hawlgalo lagula dagaalamayo argagixisada wuxuu xaq u leeyahay:-
   b. In uu helo magdhow sharci ah.
   t. In uu racfaan ka qaato tallaabo kasta oo uu u arko mid sharci darro ah.

# CUTUBKA 8-aad

# QODOBBO GABAGABO AH

## Qodobka 56-aad

## Xeer-nidaamiye

Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Xeer-nidaamiyaal iyo Habraacyo lagu dhaqangeliyo qodobada Xeerkan, kadib markii ay kala tashato cida ay khusayso



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 57-aad

## Burin

Waxaa la buriyay xeer, xeer-nidaamiye, habraac iyo wareegta kasta oo ku saabsan Argagixisada oo ka hor imaanaya ama aan la jaan qaadi karin xeerkan.

## Qodobka 58-aad

## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa markuu ansixiyo Golaha Wakiilladu, Madaxweynaha Dawlada Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة